

Sharci lamba. 18 ee 29 Juun 1967
Sharci la Xiriira “dib – u Habeeynta ee Shaqaalaha Garsoorka”

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii uu helay oggolanshada Golaha Qaranka;

WAXAA LA SOO SAARAY

Sharciga halkaan ku qoran:

Qod. 1

Amarka ku qoran faqradda 1aad iyo 2aad ee qodobka 3 ee Sharciga lamba. 10 ee 1da Agoosto 1966 wuxuu khuseeya dib-u-habeeynta shaqaalaha Garsoorka.

Qod. 2

Amarka ku qoran faqradda 3 ee qodobka 3 ee Sharciga lamba. 10 ee 1 Agoosto 1966 waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran:

“Amarrada ku tilmaaman faqradda 1aad iyo 2aad oo lagu soo saaray iyadoo la tixgeliyey habka iyo shuruuday uu qod. 35 ee sharciga lamba. 7 ee 15 Maarso 1962 iyo qod, 34 ee Xeernidamiyaha Garsoorka (DL lamba. 3 22 12 Juun 1962) oo lala akhriyo qodobka 62 ee Dastuurka”.

Qod. 3

Waxaa lagu dabaqi doonaa shaqaalaha Garsorka xeerarka u dhigan daryeelka dhaqaale ee lagu xeeriyey dib-u-habeeynta Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda sida ku cad Protokool DPR lamba. 50669 ee 22 Janaayo 1966. Sharcigaani wuxuu mid aan jirin noqon doona 28 Febarayo 1968.

Qod. 4

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuriyadda waxaana lagu keydin doonaa Keydka Rasmiga ee Shuurucda iyo Dekreeyoinka ee Jamhuuriyadda.

Waxaa la faraya in loo hoggansanado sharcigaan cid kastana loo hoggamiyo.
Muqdisho, 29 Juun 1967.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

Sh. Hassan Abdullahi